

Toddobaadkiiba hal mar ayaan gurigaaga qashinka ka soo qaadaynaa. Kalandarka ayaad ka arkaysaa toddobaadka qashinka aan qaadayno. Qashinka afar nooc ayaa loo kala qaybiyaa. Qashin haraa ah, biraha iyo dhalooyinka alaabaha lagu rito, warqad/baakad/kaartoonka cabbitaanka iyo balaastigga guryaha lagu isticmaalo. Balaastigga guryaha lagu isticmaalo waxaa lagu keenayaa bac gaar ah oo geeska jaallaha ah laga surayo tanagga loogu tala galay warqadaha/baakadaha/kartoonnada cabbitaanka.

In qashinka la kala sooco waa muhiim si aad boos ugu hesho qashinka haraaga ah. Qashinka aan tanagyada ku jirin la qaadi maayo. Maalinta aan qashinka qaadayno waa in tanagyada qashinka la dhigaa meel ugu badnaan 5 mitir u jirta meesha uu gaariga qashinku istaago. Waa in barafka la xaaqaa si ay qofka qashinka qaadaya ugu fududaato in uu tanagga qaado. Haddii ay meeshu sibibix tahay waa in lagu shubaa wax sibibixa ka baabii'ya.

Qalabkan ayaa loo baahan yahay in uu qof walba haysto. Santuukha guduudan waxaad ku aruurinaysaa qashinka khatarta ah ee kala duwan sida batariga, riinjiga, guluubyada iyo waxyaalaha yaryar ee elektaroonigga ah. Marka uu santuukhu buuxsamo ayaad gainaysaa goobta qashinka la geeyo ee kuugu dhow. Nala soo xiriir haddii aadan haysan qaar qalabkan ka mid ah.

Dhammaan noocyada kale ee qashinka ah waxaa bilaash lagu geyn karaa goobta qashinka ee kuugu dhow. Kuwaan waxaa tusaale ahaan ka mid ah saabaanka, baakad weyn oo kuwa wax lagu duubo ah, biraha, qalabka elektaroonigga ah, qashinka dhismaha, qashinka ardaagga guriga iwm. Iyo qashinka khatarta ah sida riinjiga, batariga, guluubyada iwm.



# Kalandarka qaadista qashinka ee jannaayo - juun 2021

Jannaayo							Febraayo							Maarso									
Toddobaadka	Nesbyen Krødsherad*	Gol Flå	Hol Krødsherad**	Ål	Hemsedal		Toddobaadka	Nesbyen Krødsherad*	Gol Flå	Hol Krødsherad**	Ål	Hemsedal		Toddobaadka	Nesbyen Krødsherad*	Gol Flå	Hol Krødsherad**	Ål	Hemsedal				
Isnin	Talaado	Arbaco	Khamiis	Jimco	Sabti	Axad	Isnin	Talaado	Arbaco	Khamiis	Jimco	Sabti	Axad	Isnin	Talaado	Arbaco	Khamiis	Jimco	Sabti	Axad			
53				1	2	3								9	1	2	3	4	5	6	7		
1	4	5	6	7	8	9	10	5	1	2	3	4	5	6	7	10	8	9	10	11	12	13	14
2	11	12	13	14	15	16	17	6	8	9	10	11	12	13	14	11	15	16	17	18	19	20	21
3	18	19	20	21	22	23	24	7	15	16	17	18	19	20	21	12	22	23	24	25	26	27	28
4	25	26	27	28	29	30	31	8	22	23	24	25	26	27	28	13	29	30	31				

Abril							Maajo							Juun									
Toddobaadka	Nesbyen Krødsherad*	Gol Flå	Hol Krødsherad**	Ål	Hemsedal		Toddobaadka	Nesbyen Krødsherad*	Gol Flå	Hol Krødsherad**	Ål	Hemsedal		Toddobaadka	Nesbyen Krødsherad*	Gol Flå	Hol Krødsherad**	Ål	Hemsedal				
Isnin	Talaado	Arbaco	Khamiis	Jimco	Sabti	Axad	Isnin	Talaado	Arbaco	Khamiis	Jimco	Sabti	Axad	Isnin	Talaado	Arbaco	Khamiis	Jimco	Sabti	Axad			
13				1	2	3	4	17					1	2	22		1	2	3	4	5	6	
14	5	6	7	8	9	10	11	18	3	4	5	6	7	8	9	23	7	8	9	10	11	12	13
15	12	13	14	15	16	17	18	19	10	11	12	13	14	15	16	24	14	15	16	17	18	19	20
16	19	20	21	22	23	24	25	20	17	18	19	20	21	22	23	25	21	22	23	24	25	26	27
17	26	27	28	29	30			21	24	25	26	27	28	29	30	26	28	29	30				
								22	31														

= QASHINKA HARAAGA AH    
  = GALAAS/GASACADAHHA CUNTADA IYO CABBITAANKA    
  = WARQADO IYO BAAKADO + WAXYAALAHA BALAASTIGGA AH EE GURYAHA LAGU ISTICMAALO    
  = LA QAADI MAAYO

\*Khadka isniinta Krødsherad: Xadka Flå – hoteel Sole/Fv 192 Noresund-Ringnes – is-goyska Bråtastua  
 \*\*Khadka arabacada Krødsherad: Olberg-Ringerike iyo xadka Modum, FV 191 Krøderen – xadka Sigdal  
 FG: Qashinka lama qaadi doono isniinta 17-ka maajo. Kii maalintaas la qaadi lahaa waxaa la qaadayaa sabtida 22-da maajo.

## Hagaha kala soocidda qashinka – maxay iyo sidee?

QASHIN HARAAGA AH	WARQADO IYO BAAKADO	QASHINKA GURIGA EE BALAASTIGGA AH	DHALADA/ BIRAHHA ALAABAHHA LAGU RITO
Raashin haraa ah Bacaha shaaha Warqadda kafeega lagu miiray Warqadaha iyo baakadaha kushiinka ee la isticmaalay Xafaayado Dhar, kabo Dhirta guryaha/ubax Qashinka haraaga ah inta bac ku riddid afka ka xir, si ay u fiicnaato nadaafadda tanagyada qashinka ee laguha leh.	Warqado, wargeysyo iyo iidheh Baakado yaryar Kaartoonnada caanaha -/ cabbitaanka Baakadaha alaabaha lagu duubto Waraaqaha xafiisyada, Bokhshadaha Ooriga ay ku duuban yihiin warqadaha faraha lagu qallajisto Tanagga ayaa iyaga oo sidooda ah lagu ridayaa. Balaastig ama baco warqado ah oo qashinka agagaarkiisa yaalla waxay hallaynayaan kala soocidda. Ha ku ridin buugaag gal adag leh	Bacaha balaastigga ah, bacaha iyo bacaha aluuumiyamka ah ee waxyaalaha baakadaysan sida bacaha rootiga ee balaastigga ah, baakadaha cuntada lagu duubto iwm. Dhalooyinka iyo weelasha balaastigga ah ee cuntada, daawooyinka wax lagu dhaqo iyo waxyaalaha jirka la marsado iwm. Dhalooyinka balaastigga ah ee cabbitaanka marka laga reebo kuwa dib loo celiyo ee lacagta laysu celiyo. Weelasha yoogarka iyo rommaha iwm. Baakadaha furuutka, qudaarta iyo hilibka. Weelasha ubaxa la geliyo iyo baakadaha. Inta biyo la raaciyoo ayaa tartiib loogu ridayaa jawaan. Jawaankana maalinta qashinka la qaadayo ayaa la surayaa geeska tanagga qashinka. Balaastigga wasakhda leh waxaa lagu darayaa qashinka haraaga ah. Waxyaalaha aan wax ku duubnayn ee uu taabtay qashin halis ah ama balaastigga adag iyo jawaannada xaabada. Kuwaas waxaa la geynayaa xarunta qashinka la geeyo ee kuugu dhow	Dhalooyinka sida kuwa malmalaaddada ee daboolka leh Dhalooyinka iyo qasacadaha cabbitaanka Qasacadaha birta ah ee raashinka Waraaqaha iyo weelasha aluuumiyamka ka samaysan Iyaga oo sidooda ah ayaa tanagga lagu ridayaa. Balaastig ama baco warqado ah oo qashinka agagaarkiisa yaalla waxay hallaynayaan kala soocidda. Lama oggola dhoobo, dhoobo nooc quraarad ah, koobabka cabbitaanka muraayad, weelka dhalada ah ee cuntada lagu foorneeyo ama daaqado. Kuwan waxaa la geynayaa goobta qashinka lagu tuuro ee kuugu dhow